Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 8aad
Documentiga Kalfadhiga:8-aad kulankiisa:16-aad Tr:11.06.2016

Kalfadhiga 8-aad

Kulankiisa:16-aad, sacada furitanka.12:05 gh, sacada xiranka.01:39 gd.

Guntinta:149 xildhibaan

Ajendaha:-

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **U codeynta Mashruuc Sharci wax ka beddelid Dastuur**
4. **U codeynta Sharciga lagu dhisayo Maxkamada Dastuurka**
5. **U codeynta wax ka bedalka Qodobka 10-aad eek u saabsan Mudadda xilhaynta Guddiga Madaxa-banaan ee Xuduudaha iyo Federaalka**
6. **U codeynta Heshiiska Dalalka Afrikada Bari loogu dhisayo Ciidamo Gurmad ah**
7. **Akhrinta 3-aad Sharciga Xuquuqda Siyaasiyiinta**
8. **Akhrinta 1aad Hindise Sharciyeedka Khayraadka Biyaha.**

Shir-Guddoomiye,Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

1.waxaa shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusman waxa lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka uu akhriyay xildhibaan:Ibraahim Saalax Deyfula

2.Guddoomiyaha wuxuu xildhibaanada u soo jeediyay,in ay ansixiyan ajendaha xildhibanada wey ansixiyan ajendaha.

Xildhibaan:C/lla Boss toosin, waxan ku soo koray ciidamo uu leeyahay gobolka Afrika oo la inoo kenay,Qod.6 aad ee ajendaha kulankii hore wasiirka Gaashandhiga ayaa noo akhriayay,hadaba anagoo ka doodin ayad ajendaha ku soo darteen ee an lo codeyn,in ciidamo la sameyo waxba kama qabo, waxan codsanaya in ajendaha laga saaro.

Xildhibaan:Daahir Aamiin Jeesow,wuxuu sheegay, sharci mahan ee waa Heshiis ay dowlada wadagaleen taasna wax kama wada bedeli karno,waxan rabna in ciidankeena ay noo dhisman hadaba an ansixino,waxan codsanaya in wasiirka maaliyadda iyo wasiirka Amniga loo yeero waayo 8bilood ciidanka mushaar ma qaadan.

Xildhibaan:Maxamed Cabdi Yuusuf,wuxuu soo jeediyay,waxaa nahay dowlad aan dhisneyn oo gacanta lagu hayo lagana fa'ideysan karo ilaa dowlad awood leh la helayo dowladaha heshiiskan lala galayo dib ha loo dhigo,waxan ognahay in ciidamo aan ogeyn in wadanka ay so galen.

3.Guddoomiyaha Golaha,wuxu soo jeediyay,Ajendaha intiisa kale aan galno,midka ugu horeeyo ucodeynta wax ka beddalka Dastuurka Qod.60-aad, F-36aad,guddiga wey soo dhameystiren waa muhiim in dalka Dastuur la'an noqon,waxan garaney inaan saduuq codeynta furno oo xildhibaanada shaqada ku maqan fursad la siiyo ay ku codeyan, codkana in uu ahado 180 cod.

Xildhibaan:Kulalihi,wuxuu sheegay,wadanka Soomaaliya ma ahayn Dastuur la'aan 1960 kii cid diiday malahan ra'yigaas ra'yi ka beddalan cidii qabta wey ka hadli karta,waqtigii 1960ki Dastuur afti loogu qaaday waqooyi iyo koonfur,laakiin Dastuurkan cusub,waxaa codeynta ka maqan waqooyi taasna qal-qal siyaasadeed ayay keeneysa Dastuurka sameyntiisa meeqo lacag ayaa ku baxday.

Xildhibaan:Maryan Cariif Qaasin,waxay soo jeedisay,Dastuurkan waa mid nool waligiis oo jirayo waa mid lagu soo ciyaaray waxa nagu filan midkii 1960 kii, hadanse raaceyno wacyiga cusub waa in uu raaca 1960 kii masu'liyad ayaa naga saran Dastuurka.

Guddoomiyaha Golaha, wuxuu soo jeediyay,waxan codsanaya in xildhibaanada ay nagu ayidan Qod.60 aad, arrintan waa arrin Soomaaliyeed mana ogoli dalka in uu noqdo Dastuur la'aan, waxan codsanaya in ay faraha kala baxan dadka banaanka ka jooga ee aan ku shaqada la heyn,Guddoonka wwuxuu si gaar ah ugu digaya xildhibaanada wasiiradda ah cidii aan ka wayo liiska si gaar ah ayan u la xisaabtami doona aniga iyo Rai'salwaraa.

Xildhibaan:Maxamed Cumar Dhalxa,wuxuu soo jeediyay,maxkamada Dastuuriga waa in la waa fajiya nidaamka awood qeybsiga ee dalka.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,sharciga lagu dhisayo ayan u codeyneyna ee mida aad ka hadashay dhalxa waa marka xubnaha maxkamada dastuuriga la soo xulayo,aan u codeyno habdhismeedka maxkamada Dastuuriga.

Codkiina sidan ayuu u dhacay.

Inta Ogol _____ 147 xildhibaan

Inta Diidan _____ 2 xildhibaan

Inta ka Aamustay _____ 0 xildhibaan

Guddoomiyaha Golaha,Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan,wuxuu ku dhawaaqay codkii loo qaaday sharciga lagu dhisayo Maxkamada Dastuurka waa ansax.

5.Guddoomiyaha Golaha,wuxuu sheegay, aan u codeyno wax ka beddalka Qodobka 10-aad ee ku saabsan mudadda xilhaynta Guddiga madaxa-banaan ee xuduudaha iyo Federaalka, Baarlamaanka 10-aad in loo kordhiyo.

Codkiina sidan ayuu u dhacay.

Inta Ogol _____ 148 xildhibaan

Inta Diidan _____ 0 xildhibaan

Inta ka Aamustay _____ 1 xildhibaan

Guddoomiyaha Golaha,Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan,wuxuu ku dhawaaqay codkii loo qaaday mudadda xilheynta Guddiga madaxa –banaan ee xuduudaha iyo Federaalka waa ansax.

6.Guddoomiyaha Golaha, wuxuu sheegay,Heshiiska Dalalka Afrikada Bari loogu dhisayo Ciidamo Gurmad ah,wuxu ku soo dhaweyay, wasiirka wasaarada Gaashan dhiga Mudane:S/Gaas:C/qaadir Sheekh Cali Diini.

Sida aad la socotaan dalalka Bariga Afrika waxay ku heshiiyeen iney dhistaan ciidamo gurmad ah oo iyaga ka dhexeya (EASF) Ciidamadaas oo hadba meeshii dhibaato laga soo sheego u gurmanaya,ku waas oo hadafkooda koowaad uu yahay inay xili ku habboon qaadaan tallaabooyin lagu xaqiijinayo ammniga,nabadda iyo xasiloonida Gobolka.

Haddaba,ciidamadaas gurmadka ahi waxay u baahan yihiin maamul iyo sharciyad ay ku shaqeeyaan,sidaas darteed dalalka Gobolku waxay qorteen Heshiiskii Ciidamadaas lagu maamuli lahaa oo dhammeystiran.Heshiiskaas wuxuu si rasmi ah u dhaqan gelayaa markii dalalka xubnaha ka ah hay'adda EASF ay intooda badani gooni-gooni ah u soo

ansixiyaan.Soomaalidana kol haddeey ka mid tahay dalalkii heshiiskas saxiixay,waxaa laga doonaya in ay dhankooda ka soo ansixiyaan.iyagoo waliba ka mid ah dalalka colaaduhu ka jiraan oo gurmadka u baahan.

Sidaas awgeed,mudanayaal iyo marwooyin,waxaan halkan idiinku soo gudbineyna heshiiskii dalalka Afrikada Bari ay gaareen ee lagu saleyn lahaa dhismaha iyo maamulka ciidamada gurmadka ah ee Gobolka,waxaan si sharaf leh idiinkaga codsanaya in aad akhrisaan ka baaran dagtan dabadeedna aad ansixisan.

Xildhibaan:Maxamed Cabdi Yusuf,wuxuu soo jeediyay,ilaa dowlad awood leh lahelayo dowladaha heshiiska lala galayo dib haloo dhigo.

Guddoomiyaha Golaha, wuxuu soo jeediyay, guddiga Difaca hala wareegan maalinta arbacada hanoo Kenan warbixinta ku saabsan Heshiiska dalalka Afrikada Bari loogu dhisayo Ciidamo Gurmad ah.

7.Guddoomiyaha Golaha,wuxuu sheegay, waxan galeyna akhrinta 3aad sharciga Xuquuqda Siyaasiyanta, guddiga xeer hoosadka ku soo dhawow.

Xildhibaan:Maxamed Axmed Keynan,wuxuu soo jeediyay,waxaa soo diyaariyey sharcigan guddiga Xeer-Hoosaadka, Anshaxa, Xasaanada xildhibaanada ee Golaha Shacabka Soomaaliyeed sida waafaqsan Qodobka 69(1) (B) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya, xildhibaanka wuxuu xaq u yeelanaya in uu helo 2 ciidan oo amnigiisa ilaaliya, wuxuu kaloo xaq u yeelanaya in uu helo Baasaboorka diblomasi in uu helo guno oo laba jeer sanadkii, waad mahadsan tihiin sharcigaan hora leydinku qeybiyay.

Xildhibaan:Cabdi Axmed Dhuxulow,wuxuu soo jeediyay,sharciga xuquuqda siyaasiyiinta mahan mid la ansixin karo wayo mida ku qoran waa mid sharafeed laakiin xuquuq dhaqaale mayeelanayan siyaasiyiinta xaaladda dalka wan ognahay malahan dhaqaale sidaadarteed waa in aan ka doodna oo xuquuqda lagu soo kaba mid xasaanadeed,anaga mushaar ma helno guno Ayaan qaadana, Guddoonka iyo Rai'salwasaaraha ayaa xasaanad yeelan kara, wax xuquuq rasmi yeelan karo waa Madaxweynaha isagana hada malahan.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,xasaanad waxaa yeelan kara marka uu xilka hayo mar hadii uu ka dago xilka malahan xasaanad ee siyaasiga wuxuu yeelanaya maamuus, xuquuqda kale dhaqaale ee siyaasiga waa labo bilood mushaarkiisa inta uu sanadka shaqeyay, shaqaalaha rayi'dka hal bil mushaarkiisa inta sano ee uu shaqeyay, xuquuqda laga hadlayo waa midaas, waa muhiim madaxda u soo adeegtay bulshada in ay xushmad siinayan.

Xildhibaan:Maxamed Cabdi Yusuf,wuxuu sheegay, aduunka labo sistam baa jiri jiray Hanti wadaag iyo Hanti goosi,wadamada hanti wadaaga ayaa siyaasiga siiya xuquuqda marka uu

xilka ka dago,waxaan dalkeena ma qaadi karo guno xil buu qaadanaya, halaga saaro waxan u muuqaneyna dad raadinaya dhaqaale.

Xildhibaan:Daahir Aamiin Jeesow, wuxuu soo jeediyay,waxaan qabaa in sharcigan uu sax yahay sad bursi badan ayaa ka muuqata Baarlamaanka 2 bil wey yar tahay in looga dhigo 4bil, Baarlamaano badan ayaa dalka soo maray oo ku meelgaar bey ahayeen kan maha ku meel gaar waa sax ah waa in la ilaaliyo xeer hoosadka.

Xildhibaan:Ciise Weliye Maalin,wuxu sheegay,waa mashruuc loogu talagalay in lagu fadeexayo xildhibaanada wax socon kara mahan waxan qaba in dariishada laga tuuro.

Xildhibaan:C/laahi Abshirow,wuxuu soo jeediyay,hada oo an shaqeynayno ayan la'nahay dhaqaale,shaqaale iyo ciidan dhibaato ayay ku tahay sidii hore haloo dayo oo halaga dhigo 2 bilood sanadkii xildhibaanada in ay qatan,waa in leyska dayo mida joogtada ah ,waxan la sameyn Karin hadii la yiraahdo waa la sameynaya caqabad ayay noqoneysa,Rai'salwasaaraha iyo ku xigeenkiisa inaan xuquuq joogta ah loo qorin waxa loo qoraya 4 bilood sanadkiiba, xuquuq jogta ah waxa yeelanayo Madaxweynaha oo kaliya.

Xildhibaan:C/rashiid Maxamed Xidig,wuxuu sheegay,xuquuqda siyaasiyinta an ka hormarino deganaanshaha siyaasadeed ee dalka waayo inta siyaasiyiinta dalka soo martay dhaqaalaha dalka ma saamaxayo in xuquuq la siiyo, wayo dhowr Rai'salwasaare ayaa la bedalay waa in la dayo bedalida badan ee siyaasiyiinta hadii la dhaho in taas xuquuq haloo sameeyo shacabka ayaa baabi'ayo.

Xildhibaan:Ruushka,wuxuu soo jeediyay,waxaan qabaa in siyaasiyiinta la siiyo xuquuq markey xilka ka degaan iyadoo lagu soo koobayo sanadkii 2 bilood taasna waa mid xaq loo leeyahay hadii la leeyahay lama hayo farsamey ubaahan tahay waa lagu leeyahay markii ay helaan ayay bixinayan,waxan qabaa in lagu soo kobo xildhibaan iyo Madaxweyne, waa in laga reebo Rai'salwasaaraha iyo Wasiiradda wayo waxa batay bed badalkooda.

Xildhibaan:Cali Nuur Boodaye,wuxuu sheegay,waxaan qabaa dooda in ay muhiim tahay laakiin dib aan u dhigano waxaa ino fadhiya wasiirka Tamarta iyo kheyradka biyaha, hanoo akhriyo Hindise Sharciyeedka kheyradka biyaha.

Guddoomiyaha Golaha,wuxu soo jeediyay,dooda malinta isniinta Ayaan u dhiganeyna, hada waxan ku soo dhaweynayna wasiirka tamarta iyo kheyradka biyaha ku soo dhawow.

Wasiirka:Tamarta iyo Kheyradka Biyaha,Ambassador Maxamed Mursal,wuxuu soo jeediyay, sharcigaani wuxuu u suurtagalinayaa xukuumadda JFS in ay ka hesho markii u horeysay taariikhda Soomaaliya sharci si dhameystiran u nidaaminaya kheyradka biyaha ee JFS.

Burburkii 1991 ka hor sharcigii biyaha ee Lamber.77 ee 1972,wuxuu ku koobna maamulka iyo haqabtirka baahida biyaha ee dadweynaha magaalada iyo miyiga ku nool,laakiin si fiican uma uusan qeexayn lahaan shaha biyaha (water ownership) iyo maareynta guud ee kha

yradka biyaha sidoo kale sharcigii 1972dii ma lahayn qawaaniin ku saabsan tayada biyaha, koontaroolka walxa ha wasakheeya biyaha iyo arrimo kale oo muhiim u ah maareynta khayraadka biyaha.

Xildhibaan:C/laahi Axmed Coonka,wuxuu sheegay,bishi may waxaa dhacay shir lagu qabtay Kenya Soomaaliya kama qeyb galin fai'do weyn ayuu lahaa waxaa qabatay IGAD,waxan kaa codsanayna in faah faahin naga siiso.

Wasiirka Tamarta iyo Kheyradka Biyaha,Ambassador Maxamed Mursal,wuxuu soo jeediyay, anaga shirarka nalagama qeyb galin infiteshin ayaa naloo soo diray,waxan ugu jawaabay waxan leenahay dad qubaro ah laakiin meel mugdi ah ma tageyno hadii an nala tusin bilowga meel dhexe kama gali karno.

Guddoomiye ku xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka Mudane:Jeylani Nuur Iikar,wuxuu sheegay in uu shirka xiran yahay.

Kalfadhiga 8-aad Kulankiisa:16-aad,uu shir Guddoominayay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan jawaari, uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 1:39 gd.